waxaan Naftayada ku arkaynaa wax inaan sheegno ay aad noola wayn tahay, wuxuu ku yiri: ma sidaas baad isku aragteen? waxay dheheen: haa, wuxu yiri: kaasi waa iimaan cad

Abii Hureyra raali Allaha ka ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Dad Asxaabtii Nabiga ka mida ayaa u yimid Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxayna waydiiyeen: waxaan Naftayada ku arkaynaa wax inaan sheegno ay aad noola wayn tahay, wuxuu ku yiri: ma sidaas baad isku aragteen? waxay dheheen: haa, wuxu yiri: kaasi waa iimaan cad.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Waxaa Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee u yimid qaar Asaxaabtiisa ka mida, waxay waydiiyeen waxay naftooda ku arkeen oo arimo waa weyn ah taasoo aysan ku hadli karin xumideeda iyo iyagoo ka didaya awgeed. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: waxaad isku aragteen waa iimaan cad iyo yaqiinta oo idinku riixaysa inaad diidaan waxa shaydaanku qalbiga ku tuurayo, iyo inaad diiddan ku hadalkeeda taaso naftiina ku wayn, oo shaydaanku uusan qalbigiina hanan, taas waxaa ka duwan qofka shaydaanku qalbigaiisa hantay kaaso aan helin qaab uu isaga difaaco.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65011